


# Waraha biyaha, Dhismaha iyo Ruqsadaha

**Qorshaynta isbadello ku samaynta dhismahaaga, xataa kuwo yaryar? War biyood miyaa u dhow ama ku taala gurigaaga?**

## Xataa isbadello yaryar oo lagu sameeyo aagaga waraha biyaha ayaa u baahan ruqsad.

**Wakaaladaha badan ee Federaalka, Gobalka, iyo kuwa Ismaamulka ayaa leh masuuliyado ku aadan mashruucyada laga fuliyo aaga ama gudaha waraha biyaha. U adeegso tusmadaan si aad u ogaato wakaaladaha aad kala xariirayso mashruucaaga. Ismaamulka San Diego ayaa doonaaya inuu kaa caawiyo inaad raacdo xeerka! Raac 3 daan talaabo si aad u aragto haddii aad u baahan tahay ruqsad kahor intaadan bilaabin mashruucaaga.**

## 1 Aqoonso Wartaada Biyaha.

**Haddii aad isleedahay inaad haysato midkood noocyadaan waraha biyaha oo ku yaala ama u dhow dhismahaaga, waxaad u baahan tahay ruqsad si aad mashruuca u fuliso.**

**<!>** ***Waxaad u baahan kartaa inaad la tashato xirfadle si loo go'aansho haddii war biyood ay meesha ku taalo.***



**DHUL BIYOODKA—** Deegaannada ay ka buuxaan godadka biyaha, mararka qaar keliya xiliyo gaar a, ama ciida markasta qoyan.



**KANAALLADA | BALIDA | DAAD MAREENNADA—** Aagag biyuhu ama ay mararka qaar ama mar kasta maraan ayagoo kasoo baxa meel una socda meel kale.



**DHUL CAWSEEDKA | KANAALLADA | DAAMANKA WABIYADA—** Kanaallada wabiga/baliga/daadka, biyo jiifka, iyo daamanka wabida (geesaha meelaha biyuhu fadhiyaan) ayaa sidoo kale qayb ka ah waraha biyaha ee la difaacaayo. Xataa haddii ay qalalan yihiin, wali waxaad u baahan tahay ruqsad. Kanaalladu waa meelaha dabiiciga ah ama la sameeyay ee furan oo ku xiran labo war oo biyood waxayna lahaan karaan biyo si joogto aha si goos-goos ah iskaga dhex goosha.



**HAROOYINKA | HAAMAHA BIYAHA WARAABKA—** Goob wayn oo biyood oo dhul ku xeeran yahay.

**Talaabooyinka 2+3 →**

# 2 Go'aanso Saamayntaada.

**Shaqooyinka qaarkood ayaa u baahan kara ruqsad. Haddii shaqadaadu qusayso wax kamid ah shaqooyinka soo socda, uuna jiro goob biyood ku taala ama u dhow xaruntaada. la xariir wakaalada ay qusayso ee hoos ku qoran si loo go'aansho haddii ruqsad loo baahan yahay.**



**QASHIN SAARKA—** Ka bixinta qaruuraxa iyo agabka kale salka hoose ee waraha biyaha.



**BUUXIN—** Agab kasta oo la dhex dhigo waraha biyaha (ama kanaaladoda/harkooda/daamankooda). Tan waxaa ku jira, laakiin kuma koobna, dhagaxa, ciid, caro, caagaga, qashinka dhismaha, tuubooyinka/marinnada, iyo xashka alwaaxa.



**BIXINTA|NADIIFINTA—** Dhul ka xaaqida geedaha ama ciida barakacay



**SHAQOOYINKA KALE—** Difaaca/ adkaynta qararka, dhismaha kala goysyada wadada, djismaha biyo xireennada, iyo shaqooyinka kale ee farsamada.

# 3 La tashoWakaaladaha ay Qusayso.

**Waxaa jira wakaalado kaladuwan oo sharci oo masuul ka ah bixinta ruqsadaha. La xariir wakaaladaha hoos ku qoran kahor intaadan bilaabin mashruuca si aad u hesho xog dheeri ah. Waxaad u baahan kartaa inaad la xariirto wakaalado badan oo ku jira liiskaan. Xaqiiji inaad hesho xogta faahfaahsan ee mashruucaaga diyaarsan kahor intaadan wicin.**

## La xariir Wakaalada Hoose Haddii Mashruucaagu:

- **Uu quseeyo Goob Biyood Noocay Tahayba—Gudiga Xakamaynta Tayada Biyaha Heer Gobal ee California** (619) 521-3364 | www.waterboards.ca.gov/sandiego/water_issues/programs/permits/
- **Uu Qashin ku siidayn karo Baraha Biyaha iyo/ama Waxaa ku jira Qashin Bixinta—Golaha Injineerada ee Maraykanka** (760) 602-4829 | www.spl.usace.army.mil/missions/regulatory/
- **Uu saamayn karo Qulqulka Biyaha ama Uu Badelaayo Qaabka Warta Biyaha—Waaxda California u qaabilsan Kaluunka iyo Duur Joogta** | (858) 467-4207 | www.wildlife.ca.gov/Conservation/LSA
- **Uu Quseeyo Kordhinta ama Sifaynta Heer Kasta (oo qusaysa Goob Biyood ama Aan Qusayn)—Adeegyada Qorshaynta iyo Hormarinta ee Ismamaulka San Diego** | (858) 694-2960 | www.sandiegocounty.gov/pds